



Lacagta Canshuurta Uga Soo Noqota Dadka Dakhliga Yar

Tax Refunds for People with Low Incomes

Ma khasab baa inaan canshuur xareeyo?

Dadka shaqeeya ee kastabada lacag ka sareeysa cadad cayiman waa khasab inay xareystaan labadaba canshuur-celinta dowladda dhexe ee tan gobolka. Xataa hadii aad kasbato cadad ka hooseeya cadadyadaa cayiman waa aad xareysan kartaa canshuurta si lacagi kuugu soo noqoto. Foomamka canshuurta waa in la xareeyaa ugu dambayn bisha Abriil 15 keeda. Sannadkan waxa aad canshuurta xareysan adigoo isticmaalaya dakhligii ku soo galay sannadkii hore. Kolkaa, sannadka 2026, waxa aad xareysanaysaa canshuur-celintii sannadka 2025 ka. Hadii lacag lagu yeesho waa khasab kolkaa inaad ka bixiso ganaax iyo dulsaar wixii lacag ah ee aadan bixin ka hor bisha Abriil 15 keeda.

Ogow: Waaxda Canshuuraha Barigu (IRS)] waxa ay joojinaysaa soo dirida jeegta warqadaha ah. Dadka intiisa badan ee xaraysanaya canshuur-celinta sannadkii 2025 ee shakhsiyanka ah sannadkan 2026 jeeg warqad ah oo lacagta canshuur celinta ah ma ay heli doonaan. Haddii aad leedahay akoon bangi, waxa aad u baahan tahay inaad ku qorto akhbaarta toos ugu rididda lacagta ee akoonkaaga warqadahaaga canshuur-celinta. Haddii aadan lahayn akoon bangi aadana mid furan karin, hay'adda IRS waxa ay dadka ugu baaqdaa waxyaabo kale oo la kala dooran karo sida kaararka bangigga ama kumbuyuutarka ku soo ridid lacagta ah.

Ogaanta xaquuqdaada canshuurta machaneedu wuxuu noqon karaa lacag – marmarka qaarkood lacag aan u badan – oo caawisa qoyskaaga. Waa wax aad u huri kartid waqtigaaga si aad u eegto. **Waxa dhici karta in canhuurtaada xareynteeda bilaash laguugu sameeyo.** Si aad u hesho rug caawimaad fidisa oo kuu dhow, ka wac hay'ada United Way, lambarkeeda gobolka oo dhan ah ee, 2-1-1. Ama gal shabakadeeda (website) www.211unitedway.org/about-211/somali/. Waxaad sidoo kale aad ka heli kartaa caawimaad bilaash ah shabakada ah www.irs.gov/vita.



Lacagta ka soo Noqota Canshuurta-celinta Dowlada dhexe

▪ Lacagta Canshuurta uga soo noqota Dakhliga la kasbado (EITC)

EITC waa lacag canshuureed oo u soo noqota dadka shaqeeya. . Cadadka EITC ahi waa uu is-bedelaa sannad walba. Qofka kaligii ah iyo dadka isqabaa labaduba waa ay heli karaan. Khasab ma aha inaad ilmo haysato, laakiin, lacagta soo noqonaysaa waa ka badan tahay tan kale hadii aad ilmo haysato. Waxaa jira xeerarka ku saabsan ilmaha kuwa aan sheegan kartid kolka aad


canshuurta xareysanayso. Ka eeg hoos. *Hadii aad xeerarkaa iska dhaga-tirto, waxaa lagu diidi karaa lacagta canshuurta uga soo noqota dakhliga (EITC) ilaa iyo 10 sanno.*

Waa khasab inaad shaqeysay sannadka 2025. Ma aad heli kartid lacagta (EITC) hadii aad lacag ka kasbatay dibada Mareykanka (U.S.). Kasbashooyinkaaga iyo “Dakliga Guud” ee ku qoran foomka canshuurtaadu waa khasab inay ka yaraadaan:

- \$61,555 hadii aad leedahay 3 ilmood ama ka badan oo ah ilmaha xaqa u leh (ama \$68,675 hadii aad tihiin labo qof oo is isqaba oo wada xareysanaya) – kiridhidka ugu badan waa \$8,046
- \$57,310 hadii aad leedahay 2 ilmood ama ka badan oo ah ilmaha xaqa u leh (ama \$64,430 hadii aad tihiin labo qof oo is isqaba oo wada xareysanaya) – kiridhidka ugu badan waa \$8,046
- \$50,434 hadii aad leedahay hal ilmood oo xaqa u leh in lagu xareysto canshuurta (ama \$57,554 hadii aad tihiin labo qof oo is isqaba oo wada xareysanaya) – kiridhidka ugu badan waa \$8,046
- \$19,104 hadii aadan lahayn wax ilmo ah oo xaqa u leh in lagu xareysto canshuurta (ama \$26,214 hadii aad tihiin labo qof oo is isqaba oo wada xareysanaya) – kiridhidka ugu badan waa \$8,046

Ma ka soo baxayaa shuruudaha lacagta canshuurta ka soo noqota ee (EITC)?

- Waa inaad tahay Muwaadin Mareykan (U.S.) ama degane qalaad sanadka 2025 oo dhan.
- Waxa aad u baahan tihiin inaad haysataan lambar sooshal sakuurati oo shaqeynaya **adiga, xilahaaga, iyo ilmahaaga** aad canshuurta ku xareysanayso.
- Dakhliga kaa soo gala maalgelintu waa khasab inuu ka yaraado \$11,950.
- Ma sheegan kartid Lacagta Canshuurta ka soo noqota ee (EITC) hadii qof kale uu adiga kugu xareysto canshuurta adigoo ah “ilmo xaqa u leh” in canshuurta lagu xareysan karo.
- Waxa aad sheegan kartaa waxa la yiraa EITC waxa aadna ku xareysan kartaa sidii “is qabid iyo kala xareysi” hadii aad la nooshahay ilmo aad dhashay oo xaqa u leh in lagu xareysto in ka badan sannadka barkii ama:
 - Aadan ula noolayn isla qoys sida xilaha kale ugu yaraan 6 dii bilood ee ugu dambaysay 2025, AMA
 - Si sharciyan ah aad uga guuray sida uu qabo sharciga gobolkooda iyadoo la haysto heshiis kala guurid ah oo qoraal ah ama amar cad oo kala bixid ah aadana ula noolayn isla qoyska sidii xilo oo kale aakhirka 2025.



Ma ku xareysan karaa ilmo si aan u sheegto lacagta canshuurta ee (EITC)?

Waa aad ku xareysan kartaa ilmo si aad u sheegato lacagta canshuurta (EITC) hadii:

- Ay yihiin ilmo adiga aad dhashay ama aad u qaadatay inaad korsato, ilmo aad awoowe ama aad ayeeyo u tahay, ilmo xilahaagu uu dhalay, walaal, walaalay. Sidoo kale waa aad sheegan kartaa ilmaha uu dhalay mid walba oo ehelkaagaa kor ku xusani. Waxa aad ku xareysan kartaa ilmo xaq u leh in lagu xareysto oo aad hayso.
- Ilmahu waa inuu adiga kugula noolaa wadanka Mareykanka (U.S.) in ka badan bar sannadka 2025 ka.
- Ilmahu waa inuu adiga kaa yar yahay uuna:
 - Ka yar yahay 19-sanno jir Deseember 31, 2025, ama
 - Yahay arday iskuul saacdo buuxa dhigta ugu yaraan 5 bilood sannadkii kana yar da'da 24 jir Deseember 31, 2025
- Ilmahu si rasmi ah oo buuxda uu naafo u yahay mar ay noqotabada mar ka mid ah sannadka 2025, da'du may quseeyso arrintan.
- Haddii ilmaha ay labada waalidba xaq u leeyihiin inay in canshuurta ku xareysan karaan, laakiin labada waalid midna uusan sheegan ilmaha, kolkaa, CID KALE ma ay sheegan karto ilmaha aan ka ahayn kolka Dalkhliga Guud (AGI) ee qofka sheeganayaa ilmahu uusan ka badnayn wadarta Dakhliga Guud (AGI) ee labada waalid ee ilmaha dhalay. Xaaladan oo kale waxa ay dhacdaa kolka dad ehel ah oo badani ay meel ku wada nool yihiin.

Haddii ilmahu ay canshuurta ku xareyan karaan in ka badan hal qofi, ayna labo qof ku wada xareystaan canshuurta ilmaha, kolkaa, waalidka ilmaha waqtiga ugu badan la noolaa sannadkaa waa inuu sheegtaa ilmaha. Haddii ilmahu uu la noolaa waqti is le'eg labada waalidba, kolkaa labada waalid kan dakhliga badani waa inuu sheegtaa ilmaha.

Haddii ilmahu:

- uusan labada waalid midna la noolayn
- uu yahay ilmo xaq u leh in canshuurta ay ku xareysan karaan dad ka badan hal qofi, iyo in,
- dadkaasi aysan isku raaci karin cidda sheeganaysa ilmaha, kolkaa qofka leh dakhliga ugu badan waa inuu sheegtaa ilmaha.



Kolkaa canshuur bixiyaha dakhliga ugu sareeya ee la qawimay leh ayaa sheeganaya kiridhidka.

Ka eeg [Ilmo Ma ku xareysan karaa Canshuur-Celintayda](#).

Waxa aan u hayaa ilmo dowlada. Ma ku xareysan karaa canshuurta ilmaha?

Waa aad sheegan kartaa oo ku xareysan kartaa canshuurta ilmaha aad hayso hadii ay xaq u leeyihiin in canshuurta lagu xareysan karo. Ilmaha dowlada loo hayo ee xaq u leh in

canshuurta lagu xareystaa waa ilmo ay kuu keentay adiga hay'ad loo ogol yahay meelaynta ilmaha, kugulana noolaa wadanka Mareykanka (U.S.) adiga ugu yaraan 6-bilood iyo 1 maalin mudada sannadka. Ilmahaasi waa inuu sidoo kale ka soo baxaa xeerarka da'da ee kor ku xusan.

Ma sheegan lacagta Canshuurta uga soo noqota Dakhliga la kasbado (EITC) hadii aanan ilmo lahayn?

Haa, hadii adigu:

- aad ugu yaraan 25 sanno jir tahay aadna ka yar tahay 65
- uusan qof kale mas'uul kaa ahayn
- aadan ahayn ilmo qof kale uu xaq u leeyahay inuu canshuurta ku xaraysto,
- aad ku noolayd wadanka United States in badan bar waqtiga sannadka 2025

Sidee ku helaa lacagta Canshuurta uga soo noqota Dakhliga la kasbado EITC?

- Xareyso foomka 1040 (Form 1040) ee canshuur-celinta dowlada dhexe
- Haddii aad haysato ilmo xaq u leh in lagu buuxsan karo canshuurta, xareyso foomka 1040 Foomka 1040 (Form 1040) **IYO** Jaangooyada (EIC), Foomka 1040 (Form 1040)


Hay'ada IRS tu iyada ayaa kuu xisaabisa lacagta canshuurta EITC ee aad helayso. Haddii aad xaq u yeelato lacagta, waxa aad waydiisan kartaa hay'ada IRS tu inay iyadu kuu sameyso xisaabta cadadka aad helayso. Haddii aad haysato ilmo xaq u leh inaad canshuurta ku xaraysan karto, waa khasab inaad buuxiso barka koowaad ee Foomka lacagta canshuurta ka soo noqota ee (EIC).

Lacagta canhuurta EITC ma saameysaa manfacyadayda MFIP ka, SSI, gargaarka cuntada ama manfacyo kaleba?

Badanaa, lacagta canshuurta ka soo noqota ee EITC looma xisaabiyo dakhli ahaan, bisha aad hesho jeega ama bisha xigta. 2 bilood ka dib, wixii lacagta ah ee wali aan la isticmaalin waxaa dhici karta in lagu xisaabiyo heerka hantidaadu aysan dhaafi karin kolka la eegayo xaq u yeeladka cayrta. Haddii iminka aad qaadato cayr, kala hadal hawl-wadeenkaaga saameynta lacagta kuu soo noqotay ay ku yeelanayso cayrtaada.

Horey u sii Xaqiijinta Xaq u yeeladka Lacagta EITC

Haddii hadda ka hor lagu diiday lacagta (EITC), waxaa dhici karta inaad u baahato inaad buuxiso foomam si aad u cadeyso inaad xaq u leedahay lacagta (EITC) iminka. Haddii ay hay'ada IRS tu kuu soo dirto warqad kuu sheegaysa inay khasab kugu tahay inaad arrintan sameeyso, la soo xiriir Xafiiska Gargaarka Sharciyada (Legal Aid) ee 1-(877) 696-6529.



- **Lacagta Canshuurta Ilmaha ah ee ay soo celiso Dowlada Dhexe ka yar**

Waxa aad ku heli kartaa kiridhid canshuureed oo ilaa iyo \$2,200 ah ilmo walba oo ka yar da'da 17 oo aad canshuurta ku xareysatay adigoo sheeganaya inaad mas'uul ka tahay. Buuxi xaashida Lacagta Ilmaha ee Canshuurta la isaga soo celiyo ee buuga yar ee tilmaamaha ku taal iyo Jaangooyada 8812 (Schedule 8812) ee Foomka 1040 (Form 1040). Laga bilaabo 2026, waa inaad haysato Lambarka Sooshal Sakuuratiga (Social Security) si aad u sheegato kiridhidkan. Ma aad isticmaali kartid waxa la yiraa ITIN ka mar dambe. Haddii aad wadajir canshuurta u wada xareysaan adiga iyo xilahaagu, ugu yaraan hal xilo ahi waa khasab inuu haysto Lambarka Sooshal Sakuuratiga (Social Security). Ilmahu waa khasab inuu siddoo kale uu haysto Lambarka Sooshal Sakuuratiga (Social Security). Waa sheegan kartaa lacagtan **iyo** mida canshuurta (EITC) da. Haddii aad iska indho-tirto xeerarka Lacagta Ilmaha Canshuurta la isaga soo celiyo, waxaa lagu diidi karaa Lacagta Ilmaha Canshuurta la isaga soo celiyo muddo ilaa iyo 10-sanno gaari karta. Haddii aadan xaq u lahayn Lacagta Ilmaha Canshuurta la isaga soo celiyo, waxaa dhici karta inaad xaq u yeelato **lacagta dowlada dhexe ku bixiso dadka kale ee aad mas'uulka** ka tahay taa oo ah \$500 qof walba oo aad mas'uul ka tahay.

- **Lacagta Dowlada Dhexe Ilmaha ku Bixiso iyo Lacagta lagu bixiyo Daryeelka Dadka Mas'uulka laga yahay**

Haddii aad gasho kharashaad haynta ilmaha ah kolka aad shaqaynayso ama aad shaqo raadinayso, waxa aad heli kartaa lacag canshuurta kaaga soo noqota. Waxa aad sheegan kartaa kharashyada aad ku bixiso haynta ilmaha aad mas'uulka ka tahay ee ka yar 13-sanno jirka ama qof aad mas'uul ka tahay oo naafa ah da' kastaba ha jiree. Si aad lacagtan u hesho, waa khasab in aad hesho aqoonsiga (ID) canshuur-bixiyaha ee qofka ama barnaamijka bixinaya adeegyada haynta ah. Xareyso Foomka 2441 (Form 2441).

- **Lacagta Tacliinta la Isu soo Celiyo ee Dowlada Dhexe**

Haddii aad ku bixisay lacago iyo khidmado kale tacliin jaamacadeed ama kuleej oo adiga, xilihaaga ama qof aad mas'uul ka tahay uu qaatay, waxa aad heli kartaa ilaa iyo \$2,500 oo ah lacagta tacliinta la isugu soo celiyo arday walba oo xaq u leh. Xareyso Foomka 8863 (Form 8863).

- **Jaritaanadda Cusub ee Lacagta la Canshuurayo ee Dowladda Dhexe**

Xareysiga canshuuraha ee Sannadaha 2026 ilaa iyo 2028, waxa aad awoodi doontaa inaad hesho yareyn dhanka canshuurida lacagaha ah. Qaar ka mid ah shaqaalaha hela lacagta bakhshiiska ah iyo shaqaalaha saacadaha dheeraadka ah lacagtooda qaata waxaa dhici karta inay ka jaraan qaybo ka mid ah dakhligaa la canshuurayo ilaa cadad cayiman. Dulsaarta amaahda gawaarida waxaa laga jari karaa noocyo ka mid ah gawaarida. Haddii aad 65 sanno jir tahay ama aad ka weyn tahay waxaa dhici karta inaad sheegato ka jaritaan dakhliga oo \$6,000 oo kale oo dheeraad ah oo ka go'aya dakhliga la canshuurayo. Dhamaan ka jaritaanadda dakhliga waxa ay leeyihiin xadidaadyo iyo xadad dakhliga ah. La tasho canshuur-diyaariye xirfad u leh arrimaha haddii aad is-leedahay inay dhici karto inaad xaq u leedahay mid walba oo ka mid ah arimaha cusub ee dakhliga la canshuurayo.

Lacagaha La Isu soo Celiyo Ama La Iska Jaro ee Minnesota

▪ Kiridhidyadda Ilmaha iyo Qoyska Shaqeyaya ee Minnesota

Haddii aad ka soo baxdo xeerarka EITC waxa aad heli kartaa Kiridhidka Qoyska Shaqeyaya ee Minnesota. Haddii aad haysato ilmo xaq u leh, waxaa iyana laga yaabaa inaad hesho Kiridhidka Canshuurta Ilmaha Lacagtu ku soo noqoto ee Minnesota. Si aad u sheegato kiridhidyadaa, buuxi foomamka canshuurta ee dowlada dhexe iyo foomamka Minnesota ee M1 (foomka caadiga ah) and Jaan-gooyada M1CWFC.



Waxa aad dooran kartaa in lagu sii qadimo lacagta Canshuurta Kiridhidka Ilmaha ee Minesota ee sannadka soo socda. Lacagtan qadimaada ah waxaa la bixiyaa iyadoo 3 cadad oo isle'eg ah inta sannadka lagu jiro. Waa khasab inaad ka soo baxdo shuruudo cayiman, oo ay ku jiraan xareysiga canshuur-celinta sannadka soo socda wax kasta ha noqdo dakhligaaguye. Waa muhiin inaad ogaato in arrintani ay saameyn karto manfacyadaadda la yiraa SNAP ka. Wixii akhbaar ah ee kale, booqo, shabakadda (website) Waaxda Dakhliga ee Minnesota (Minnesota Department of Revenue) ee ah www.revenue.state.mn.us/advance-payments-child-tax-credit.

▪ Lacagta Ilmaha iyo Daryeelida Dadka Mas'uulka laga yahay ku soo noqota ee Minnesota

Waxa aad heli kartaa lacagta canshuurta ee gobolku u soo celiyo kharashaadka kuu gala daryeelida ilmaha ama dadka naafada ah ee mas'uulka laga yahay awgood inta aad shaqeynayso ama shaqo raadiska aad tahay. Dadkaa aad mas'uulka tahay waxa ay noqon karaan ilmo ka yar 13-sanno jir ama qof aad mas'uul ka tahay oo naafa ah da' kastaba ha jiree. Haddii aad haysato ilmo hadda dhashay, waa aad sheegan kartaa kiridhid xataa haddii aadan lahayn kharajyadda daryeelida ilmo mas'uul laga yahay. Si aad u sheegato lacagtan, buuxi foomamka canshuurta ee dowlada dhexe iyo foomamka Minnesota ee M1 (foomka caadiga ah) and Jaan-gooyada M1CD.

▪ Lacagta Tacliinta La Isaga Soo Celiyo iyo Ka Jaritaanada ee Minnesota

Waxa aad heli kartaa lacago ay canshuurta gobolku kaaga soo celiso ama ka jaritaano ah kharashaadka waxbarashada ilmahaaga ama waxyaabaha la xiriira. Kuwaasi waxa ay bixiyaan kharashaadka tacliinta ilmaha ee laga bilaabo uulada ilaa iyo dugsi sare. Cadadka ugu badan ee lacagta ee la sheegan karaa waa ilaa \$1,500 ilmahiiba. Waxaa aad u isticmaali kartaa lacagtaa waxyaabaha sida casharada gaar u wax ugu dhigida ah, buugaaga iskuulka iyo alaabada kale, khidmadaha lagu bixiyo waxyaabaha kale sida gaadiidka, casharada muusikada, barnaamijyada iskuulka ka dib la galo iyo xeryaha xilliga xagaaga waxbarashada loo aado. Waxaad kaloo u isticmaali kartaa lacagtaa kharashaadka aaladaha kumbuyuutarada ee waxbarashada (software) loo isticmaalo (\$200 weeye xadka kiridhidku laakiin waxaad kaloo ka jari kartaa \$200 oo kale). Khidmadaha iskuulada gaarka loo leeyahay waxa ay noqon karaan ka jarid ee ma aha lacag soo noqonaysa. Si aad u sheegato lacagtan, buuxi foomamka canshuurta

ee dowlada dhexe iyo foomamka Minnesota ee M1 (foomka caadiga ah) iyo Jaan-gooyada M1ED. Si aad u hesho ka jaridan, buuxi Qorshaha M1M (Schedule M1M).

▪ **Lacagaha Kiridhidyadda Kiraystaha iyo Mulkiilaha Guri**

(waxaa loogu yeeri jiray Lacagta u soo noqota Kiraystaha iyo Tan ka soo noqota Canshuurta Guriga)

Lacagtan soo noqonaysaa waxa ay ku salaysan tahay dakhligaaga iyo cadadka canshuurta guryaha ah ee aad bixiso adigoo mulkiile guri ah ama kireyste ah.

Kiraystayaashu waxa ay ka helaan Warqada Kirada la Bixiyey (CRP) qolada ay guriga uga jiraan. Hadii qolada gurigu aysan ku siin warqadaa, eeg warqadayda xogta xafidan ee [Lacagaha ku Soo Noqda Kiridhidka Kiraystaha iyo Kiridhidka Mulkiilaha Guri](#) .

Kiraystayaashu waa inay buuxiyaan Qorshaha M1RENT iyo sidoo kale Canshuurta Celinta Dakhliga ee Minnesota si ay u helaan kiridhidka kiraystaha. Sannad canshuureedyaddii ka horeeyey 2024, ku xaree Foomka M1PR la yiraa.

Lacagta u soo noqota mulkiilayaasha guryahu waxa ay ku salaysan tahay oraahda canshuurta la bixin doono sannadka soo socda. Guriga ama abaartamiintadu waa khasab in ay noqoto deegaanka weyn lagu nool yahay. Si aad u sheegato lacagtan, buuxi foomamka canshuurta foomka M1PR. Foomkan waxaa in la xareeyaa ugu dambayn Ogoosto 15. Lacagtan waxa aad haystaa hal sanno oo aad ku codsan karto.



Hadii aadan wali Xareysan Canshuurtii, Xareyso Iminka!

Lacagta Canshuurta ee Dakhliga la Kasbado (EITC) iyo lacagaha kale ee canshuurta la isaga soo celiyaa waxaa la sheegan karaa ilaa 3-sanno ka dib kolkii la rabay in la xareysto. Hadii aadan canshuur xareysan qaar ama dhamaan 3-sanno ee la soo dhaafay, hadda waa aad xareysan kartaa waana aad sheegan kartaa lacagta canshuurta ee (EITC) da iyo lacago kale oo kuu soo noqon kara. Foomamka iyo cadadka lacagta ah ee la ogol yahay waa ay isbedbedelaan sannad walba. Hubi inaad isticmaasho foomka loogu talagalay sannadka aad xareysanayso! Foomamka si aad u hesho ka wac hay'ada (IRS) telefanka hoose ama waxa aad ka heli kartaa shabakadooda (website) ah, www.irs.gov. hadii aad canshuur xaraysatay laakiin aadan wada sheegan lacago hadda aad is leedahay inaad sheegatay ahayd, waxa aad xareysan kartaa cusboonaysiinta Foomka 1040X (Form 1040X) (dowlada dhexe) ama kan M1X (Minnesota) mid walba oo ka mid ah 3-dii-sanno ee la soo dhaafay.

Su'aalaha canshuurta dowlada dhexe, ka wac (800) TAX-1040.

Su'aalaha canshuurta Minnesota, ka wac (651) 296-3781.

Caawimaad Canshuurta ah oo Bilaash ah

Canshuur **bilaash** loogu xareeyo ayey heli karaan dadka danyarta ah, ama naafada ah, ama waayeelka ahi. Si aad u hesho rug caawimaad fidisa oo deegaankaaga ah, wac khadka ah (651) 297-3724 ama ka wac hay'ada United Way, lambarkeeda gobolka oo dhan ah ee 2-1-1. Waxaad kalood ka heli kartaa akhbaarta caawimaadaha bilaash ah ee deegaankaaga shabakada www.irs.gov/vita.

***Xogta aruursan ee warqadani waxa ay quseeysaa uun canshuurta sannadka 2025.
Canshuur-celinta waa in la xareystaa ugu dambayn bisha Abriil 15th, 2026***

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.